IOWA READING RESEARCH CENTER
Student Reading Success Through Research and Collaboration

# La barashada af Ingiriis Carruurtaada iyo Dhaliinta:Iyada oo la isticmaalayo Junk Mail (Fariimaha Xayeysiinta) si loogu Tababarto Ingiriis



Ka timid Nicole DeSalle, Xiriiriyaha Qorayo, Xarunta Cilmi baarista Aqrinta Iowa

*Qoraalka tafaftiraha:Wada barashada waxay sare u qaadi kartaa xirfadaha luuqada Ingiriiska carruurta iyo dhalinyarada sidoo kale sida midaada.Boostigaan wuxuu ka qeyb yahay taxane socdo oo loo naqshadeeyay inay caawiso daryeelayaasha ardayda Ingiriiska ah inay helaan fursadaha barashada Ingiriiska ee qoyska oo nolol maalmoodkooda.*

Waxaan ku noolnahay caalam dhijitaal ah.Iyo weli, da’daan fariimo qoraalka iyo app-ka mobleelka casriga ah, sanduuqa boostadaada ayaa weli si joogta ah uga buuxo fariimaha xayeysiinta sida xaanshiyada rasiidyada iyo xayeysiimaha.Inkastoo dareenkaaga laga yaabo in aad si toos ah u geleisid waraaqaha weelka qashinka, waxaa jiro qaabab lagu isticmaalo in fariimaha xayeysiinta ama sheeyada kale ee maalin walba (si guud loogu yaqaan sida *aadalaha barida*) ee lagu taageero hormarinta farbarashadaada Ingiriiska sidoo kale sida midaas carruurtaada iyo dhaliinta.Luuqada waxay noo suurtogelisaa inaan xalino dhibaatooyinka iyo bulsho ahaan dhax galno dadka kale (Vygotsky, 1978).Sidaas darteed, ku dhaqmida realiasida rasiidyada iyo xayeysiimaha waxay kuu ogolaan karaan adiga iyo carruurtaada ama dhaliinta inaad ku dhaqantaan xaaladaha iyo dhaxgalada ka dhaco nolosha maalinlaha.Noocaan aaladaha barida sidoo kale waxay kugu caawin karaan adiga iyo carruurtaada ama dhaliinta inaad heshaan cilmiga

dhaqanka ee ku saabsan Mareykanka, sida noocyada badeecooyinka ee laga heli karo dukaamada iyo noocyada warbixinta inta badan laga helo xayeysiimaha (Xu, 1999).

## Wada Dhisida Cilmiga Taariiqda

Ardayda af Ingiriiska, erayadaan waa waxtar in la ogaado ka hor inta aadan isku dayin howlaha ku jiro boostigaan.

- Waxaa jiro fariin aad heshay oo aad rabtay inaad heshid, sida warqad, ama wax aad u baahantahay inaad heshid biil noocaas ah.Fariinta aadan rabin inaad heshid waxaa marwalba loo yaqaan *fariimaha xayeysiinta*.Rasiidyada iyo xayeysiimaha waa noocyo fariimaha xayeysiinta.Xittaa inkastoo xayeysiimaha iyo rasiidyada ay waxtar noqon karaan, dad badan waxay u yaqaaniin fariimaha xayeysiinta sababtoo ah waxay helaan wax badan iyo sababtoo ah maysan weydiisan.Erayga *spam* waxaa inta badan loo isticmaalaa in lagu qeexo noocaan tusmada aan la rabin oo laguugu soo diro i-meel.Wixii warbixin dheeraad ah ee ku saabsan mowduucaan, ka aqri [maqaal ku saabsan spam] ee ka imaanayo websaydka oo ardayda Ingiriiska, *Ingiriiska Aqbaaraha Degdega*.
- *Rasiidka* waa tikid ama gabal yar oo warqad ah oo ku siiyo dhimista badeecada ama adeega.Rasiidyada waxaa laga heli karaa jaraa'idka ama onleenka.Rasiidyada waxaa inta badan lagu gaarsiiyaa fariin ahaan.Iyo rasiidyada, waxaad heli kartaa dhismista oo noocyo walba oo badeecooyin ah, sida cuntada, oomada dhar dhaqida,ama shukumaanada warqada.Si aad u isticmaashid rasiidyada, la imaw tikidka warqada ah (ama daabac haddii ay tahay onleen) oo adiga aad keydisid.Sii rasiidka qasnajiga markii aad ku bixineysid miiska lacag bixinta.




- *Xayeysiinta* waa ogeysiin ku saabsan badeeco, adeega, ama dhacdada.Xayeysiimaha inta badan waxaa loola jeedaa ogeysiinta dhimista ama yareynta qiimaha.Qaar ka mid ah xayeysiimaha waxaa ku jiro rasiidyada.

Waad kala hadli kartaa su'aalaha xiggo carruurtaada ama dhaliinta af Ingiriis ama luuqadaada hooyo:

- *Miyaan leenahay fariimaha xayeysiinta wadankeena hooyo?Sidee ayaa ula mid tahay ama uga duwantahay fariimaha xayeysiinta ee Mareykanka?*
- *Miyaan isticmaalnaa rasiidyo?Maxaan caadi ahaan ku iibsanaa rasiidyada?*
- *Miyaan dhawaan ku helnay xayeysiin fariinta?Warbixin noocee ayay wadataa?*

Waxaad dooran kartaa inaad dib ula booqatid su'aalaha qaar ama dhammaan su'aalaha carruurtaada iyo dhaliinta adiga oo la kulmay fariimo badanoo xayeysiin ah.

# Wada Dhisida Xirfadaha:Howlaha Isticmaalayo Junk Mail (Fariimaha Xayeysiinta) si loogu Tababarto Ingiriis

Howlaha hoose waa qaababka hoose ee aad ugu isticmaali kartid fariimaha xayeysiinta sida rasiidyo iyo xayeysiin aad kula tababaratid Ingiriis carruurtaada iyo dhaliinta.

## Aasaas Sawirka Qaamuuska

Waxaad aruurin kartaa rasiidyo badan iyo xayeysiimo.Si loo abuuro sawirka qaamuuska, ku diyaari iyaga alfabeeta ahaan oo album buug ah.Adiga oo diyaarinayo, tilmaan rasiidyada iyo xayeysiinta oo haku aqoonsado canugaaga ama dhaliinka badeecada magaca Ingiriiska ah.Kadib ha tilmaamo canugaaga ama dhaliinka rasiidka aad adiga aqoonsatid si markaas aad ugu tababaratid eray bixinta, sidoo kale.Markii aad abuurtid sawirka qaamuuskaaga, waad u isticmaali kartaa inaad ku tababaratid xirfadaha luuqada Ingiriiska kale sida naxwaha iyo ku dhawaaqida.

## Ku tababaro Naxwaha:Magacyada La xisaabin karo iyo Aan la xisaabin karin

Iyo carruurtaada ama dhaliinta, aqoonso badeecooyinka rasiidyada oo ah magacyada la xisaabin karo iyo aan la xisaabin karin.Tusaale, ukumaha waa la xisaabin karaa sababtoo ah waa lambareyn kartaa mid walba.Sidoo kale, waxaa caadi ahaan lagu iibiyaa baakid oo leh lambar gooni ah sida 12 (sidoo kale loo yaqaan sida darsin).Si ka duwan, badarka lama xisaabin karo sababtoo ah way adkaaneysaa ama macquul ma ahan in la lambareeyo jab walba ama gabal badarka ah.Iyo, badelkii lagu iibin lahaa tiro ahaan waxaad ku xisaabin kartaa gacan ahaan, badarka waxaa lagu iibiyaa cadadyo la cabiray sida kartoonka 12-waqiyadood badar ah.Waxaa xiggo, isticmaal rasiidyada si aad u sameysid liiska bagaashka.Iyo canugaaga, koobaab magacyada la xisaabin karo: tufaaxyada, mooska, shukumaanada warqada, iwm. Ku sawir kartoon agagaarka magacyada aan la xisaabin karin: caanaha, rootiga, oomada.

**Tababar badan:**Iyo canugaaga ama dhaliinta, ku kooxey sheeyada liiskaaga bagaashka, sida produce," "household cleaners," iyo "dairy."Tusaale ahaan, caanaha iyo jiiska waa noocyada waxyaabaha caanaha.Ku qor erayga "dairy" liiskaaga oo hoos xariiq.Kadib ku qor "dairy' iyo "cheese" hoosteeda.Weydii dhalinta ama canuga:

*Waa qaar ka mid ah walaxaha caanaha?*

## Ku tababaro Ku dhawaaqida:Ku dhammaanayo Shibanaha (yaalka)

Iyo carruurtaada ama dhaliinta, aqoonso badeecooyinka ku jiro rasiidyada ku dhamaado xarafka "s," sida "eggs," "cupcakes," "paper towels," iyo "bananas.""s" waxaa loo isticmaalaa inay ka

dhigto sheeyada wax badan.Sharax in markii erayga ku dhammaado shaqal ama dhawaqa kale ee shibanaha codka sida “m, “n,” “ng,” “l,” “b,” “d,” “g,” “v,” r”,” ama codka “th,” iyo “s” ayaa lagu daraa si looga dhigo erayga wax badan oo wuxuu leeyahay dhawaqa /z/.Dheh erayga “eggs,” oo xooga saarayo dhawaqa /z/ ee dhammaadka erayga.

Kadib sharax in markii eray ku dhammaado dhawaq cod la’aan ah sida “p,” “t,” “k,” “f,” ama dhawaqa cod la’aanta “th”, “s” waxay leeyihiin dhawaqa /s/.Dheh erayga “cupcakes,” xooga saareysid dhawaqa /s/.

Wada go’aanso haddii rasiid walba ee ku dhammaanayo shibanaha “s” waa in loogu dhawaaqaa dhawaqa /z/ ama /s/.

## Ku tababaro Xirfadaha Hadalka:Weydii oo ka Jawaab Su’aalaha (Imisa?)

Iyo carruurtaada ama dhaliinta, door ka ciyaarka ee ahaanshaha macmiil iyo qasanji.Isticmaal qaababka jumlada hoose si aad ugu tababartid weydiinta iyo ka jawaabida su'aalaha ee ku saabsan rasiidyada ka imaanayo sawirka qaamuuskaaga.Ka dib wareeji doorarka.

### Qaabdhismeedyada Jumlada ee loogu Tababaranayo Ku hadlida Ingiriiska

| | | | |
|---|---|---|---|
| **Su’aalaha:** | Intee ayaan ku keydin karaa _____________ee rasiidkaan? | **Tusaalooyinka:** | *Imisa ayaan ku keydin karaa* ***mooska*** *ee rasiidkaan?*<br><br>*Imisa ayaan ku keydin karaa* ***badarka*** *ee rasiidkaan?* |
| **Jawaab:** | Waxaad keydin kartaa _______. | **Tusaalooyinka:** | *Waxaad keydin kartaa* ***39 senti****.*<br>*Waxaad keydin kartaa* ***12 doolat****.* |

Qaababka jumladaan waxay kuu ogolaanayaan adiga iyo carruurtaada ama dhaliinta ku tababarashada magacyada la xisaabin karo (fiiri Ku tababaro Naxwaha:Magacyada La xisaabin karo iyo Aan la xisaabin karin ee kore).Adiga oo tababaranayo, xasuuso in magacyada la xisaabin karo ay ku dhammaan karaan xarafka “s” iyada oo magacyada aan la xisaabin karin aysan.Tusaale ahaan, erayga “bananas” waa magaca la xisaabin karo iyaga oo erayga “cereal” ma ahan magac la xisaabin karo.Qaababka jumladaan waxay sidoo kale kuu ogolaaneysaa adiga iyo canugaaga ama dhaliinka inaad ku tababarataan ku dhawaaqida dhammaadka shibanaha “s” (sfiiri Tababarka Ku dhawaaqida:Ku dhammaanayo Shibanaha (yaalka) ee kore).Xasuuso in erayadaas ee leh

dhammaadka shibanaha “-s” waxay ku dhammaan karaan midkood dhawaqa /s/ ama /z/.Tusaale, erayga “cents” wuxuu ku dhammaadaa dhawaqa /s/ iyada oo erayga “dollars” ku dhammaado dhawaqa /z/.

## Ku tababaro Wada sheekeysiga Ingiriiska

U sheeg carruurtaada ama dhaliinta inaad aadeysid safarka dhammaadka isbuuca.Wada go’aansada halka aad u socotid.Ku dheh iyaga:

*Waxaa kaliya oo aan la imaan karnaa inaga sadex sheeyo.Maxaan la imaanaa?*

Iyada oo ay kula jiraan carruurtaada iyo dhaliinta, go’aanso sadexdee sheeyo ee ku sawiran rasiidkaaga naxwadaha ayaa inta badan waxtar u yeelaneyso safarkaaga dhammaadka isbuuca.Waxaad si hubaal ah u tixgelin kartaa cadadka keydinada ee rasiidyada ku jiro go’aankaaga.Adiga oo la hadlayo carruurtaada ama dhaliinta, isku day inaad isticmaashid oo aad si sax ah ugu dhawaaqdid magacyada la xisaabin karo iyo aan la xisaabin karin.

**Fiiro gaar ah:**Xasuuso in markii aad kula tababaraneysid wadasheekeysiga Ingiriiska carruurtaada iyo dhaliinta, waxaa kuu wanaagsan inaad isticmaashid erayo, jumlooyin, ama jumlooyinka ku jiro luuqadaada hooyo haddii aadan garaneyn sida loogu dhaho wax af Ingiriis ama haddii eray ama afkaar u baahantahay sharaxaad badan.Iyada oo lagu dhafayo luuqada hooyo waxay noqon kartaa qaab wax ku ool ah ee lagu dhameystiro shaqada iyo si loo taageero waxbarashada tusmada cusub ee luuqada diirada ama cusub (Genesee & Lindholm-Leary, 2012).Yoolka tababarka wadasheekeysiga waa helida fursado badan ee loogu isticmaalo Ingiriis sida aad awoodid.Waxaad arki kartaa adigoo isticmaalayo Ingiriis badan waqti walba oo aad hadashid.

Markii aad baraneysid luuqad cusub iyo dhaqan cusub, waxyaabaha aad la kulantid nolosha maalinlaha waxay ku siin karaan fursadaha barashada cusub.Fariimaha xayeysiinta waa hal qaab oo loogu tababarto si bilaash ah af Ingiriiska iyo qoraalada aad ka heli kartid sanduuqaaga.

Wixii tababar dheeraad ah, isku day mid ka mid ah Howlahaan oo ku Isticmaalida Fariimaha Xayeysiinta ee Fasalka ESL/EFL websaydka *Joornalka Intarneetka TESL*.

## Tixraacyada

Genesee, F., & Lindholm-Leary, K. (2012).Waxbarashada ardayda luuqada Ingiriiska.In K. R. Harris, S. Graham, T. Urdan, A. G. Bus, S. Major, & H. L. Swanson (Eds.), *APA buugyarayaasha ee cilmi nafsiga®.Buugyaraha waxbarashada cilmi nafsiga APA, Vol. 3.Arjiga waxbarashada iyo wax barida* (pp. 499–526).Ururka Cilmi nafsiga Ameerikaanka.https://doi.org/10.1037/13275-020

Vygotsky, L.S.(1978).*Maanka bulshada:Hormarinta nidaamyada cilmi nafsiga sareeyo*.(M. Cole, V. John-Steiner, S. Scribner, & E. Souberman, Eds.).Harvard University Press.

Xu, Hong.(1999) Young Chinese ESL children's home literacy experiences.*Aqrinta Horizons:Joornalka Farbarashada iyo Farshaxanka Luuqada*, *40*, 47–64.https://scholarworks.wmich.edu/reading_horizons/vol40/iss1/3